

Siyaasadda – Maareynta Dhibbaatada

Qorshe hore oo loogu talagalay ka hortaga xaaladaha degdega ah waa mid aasaasi ah diyaarintiisu si loo sugo ammaanka ardayda, shaqaalaha, iyo dadka soo booqdadugsiga, haddii ay dhacaan wax ammaanka halis gelinaaya. Sidoo kale waxay xoojinaysaa niyadda dadka dhammaan khuseyso oggaanshaha in qorshe diyaar garow uu jiro iyo in ardayda iyo shaqaaluhuba lagu tababaray in ay dibadda geeyaan. Ka hortaga, diyaar garoowga, ka jawaabida, iyo badbaadinta waa xaaladaha maareynta dhibbaatada uga hadashay DPS Jawaabta Degdega ah iyo qorshaha Maareynta Dhibbaatada (ERCM).

Maamuleyaasha goobta, ama kuxigeenadiisa ayaa hubsan doona in dugsigooda uu yahay mid u hoggaansan Barnaamijka ayaga oo raacaya baahooyinkaan soo socda:

Dugsiga kasta kooxdiiisa jawaabta degdega ah (E-Team) ayaa ka qaybgeli doonta tababarka sannadlaha ah ee degmada ERCM.

- Maamulaha goobta, ama kuxigoonadiisaa, ayaa gudoomi doona qorshaha maareynta degdega ah ayada oo la tixraacayo qorshaha sannadlaha ah ee ERCM bilowga sannad dugsiiyeed kasta.

- Kooxaha jawaabta degdega ah ayaa tababari doona dhammaan shaqaalaha dugsiga (lagu daray ardayda, xirfadlayaasha, iyo shaqaalaha cuntada ka adeegga) ayaga oo lagu tababarayo nidaam hawleedyada caadiga ah ERCM .

- Goobta maamulayaasha, ama kuxigeenadooda ayaa hubsan doona tababarka dabka kadhaca iskuuladooda ee biloodlaha ah.

- Maamuleyaasha goobta, ama kuxigeenadooda, ayaa hubsan doona tababarka dugsiyadooda noocyada kale ee tababarka ah sida looga tilmaamay barnaamijka ERCM.

Maamuleyaasha goobta iyo shaqaalaha dugsiga ayaa qaadan doona fursad kasta oo loogu wargelin karo waalidiinta nidaam hawleedyada la raaco jawaabta degdega ah.

Barnaamijka degmada ERCM wuxuu u hoggaansan yahay Nidaamka Caalamiga ah ee Maareynta Dhacda (NIMS).

Haddii la sameeyo oo laga soo baxo hawlaha kor ku qoran dhammaan shaqaalaha DPS waxay daa'imayaan Qawaaniinta Dib loo hubiyay ee Degmada Colorado 22-32-109.1 (4) iyo C.R.S. 22-32-109 (4).

La ansixiyay: 19 Oktoobar , 2000

La muraajaceeyay: 17 Janaayo, 2008

TIXRAACA SHARCIGGA.: C.R.S. 22-32-109.1(4)